iib ma galo

# FAAFINTA RASMIGA

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومالية الديمقراطية

Sannadka 11aad Muqdisho 1 Juunyo 1983 L. 6

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S. QIIMADU Waa 5 Shan lambar walba—RUKUNKA: Sannadii waa Sh. So. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Sh. So. 300 Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wu xuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa 2 laba Ih. Rukunka & qorista nka waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmi ga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

**QAYBTA KOOWAAD**

S H A R C I

W. M.

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER WASAARADDA GAASHAANDHIG GA L. 6 ee 27 Maajo 1983, Xeer Nidaa miyaha Hawlaha Difaaca Qaranka

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.

Wakaaladda M. Qaranka

WASIIRKA GAASHAANDHIGGA

MARKUU ARKAY: Qod. 15 bis ee Sharciga Hawsha Difaaca Qaranka L. 32 ee 28 Abriile 1981. oo awood siinayo in uu soo dejiyo Xeer nidaamiye lagu hirgeliyo laguna fuliyo Sharciga kor ku magacaaban.

MARKUU GARTAY: Baahida deg deg ah ee loo qabo in Sharciga Hawsha Difaaca Qaranka loo dejiyo Xeer Nidaamiye u gaar ah oo lagu hirgeliyo.

TIXGELIYAYNA: Soo jeedinta Guddiga loo magacaabay diyaarinta Xeer Nidaamiyahaas.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer Nidaamiyaha soo socda:

QAYBTA KOOWAAD

UJEEDDADA IYO MAAMULKA GUUD EE H. D. Q.

Qod. 1aad

HAWSHA DIFAACA QARANKA

1. Hawsha Difaaca Qaranka waa hab la doonayo in lagu abuuro Ciidanka abaabulan Muwaadiniinta Soomaaliyeed oo dhan iyagoo si isdabajoog ah ugu kaltamayaan ka qayb galkiisa si loo fuliya waajibaadka asaasigaa ah oo lagu xaqiijinaayo Difaaca Waddanka, ilaalinta soohdimaha Qaranka, sugidda nabadgelyada gudaha iyo u gurmashada dhibaatooyinka la xiriira dabeecadda.

2. Waxaa loogu yeeri karaa H.D.Q. Muwaadin kastaoo caafimaadkiisu jireed iyo maskaxeedba wada dhan yihiin, da'diisuna u dhexeyso 18 ilaa 40 sano waxaa na muwaadinka, keyd ahaan loogu haynayaa hawsha Difaaca Qaranka ilaa uu ka gaaro 50 sono.

3. Waxaa kaloo loogu' yeeri karaa hawsha Difaaca Qaranka qof kasta oo aan jinsiyad lahayn (apolide) ee ku dhashay ama ku dhaqan dalka J. D. S.

Qod. 2aad

UJEEDDADA HAWSHA DIFAACA QARANKA

Ujeeddada laga leeyahay Hawsha Difaaca Qaranka waxay tahay:—

1. In Muwaadiniinta Soomaaliyeed oo dhan, marka ay buuxiyaan shuruudaha ku xusan Qodobka 1aad la soo mariyo tababar Militeri oo loogu laylinaayo barashada hawsha Ciidanka iyo takhasusyada kala duwan iyadoo isla markaana ay ka shaqeynayaan muddo kooban oo ku beegan marka ay Muwaadiniintu yihiin barbaar itaalkooda buuxa si ugu dambeystii loo helo Ciidan karti iyo tayaba leh.

2. In Ciidanka uu si joogto u helo dhallinyaro yididiilo iyo niyad sare u leh gudashada waajibaadka hawsha Ciidamada isla markaana loo xaliyo culeyska dhibaatooyinka bulshadeed oo waqtiga la xiriira ee badanaa la soo gudboonaada askarta iqtiyaariga ku soo gashay Ciidammada ee muddo dheer Ciidanka gudishiisa dhexjooga.

3. In xirfadaha iyo farsamooyinka kala duwan ee Ciidammada laga qayb geliyo dhallinyaro aqoontooda guu sarreyso oo si buuxda u hanan karaan tekniloojiyada Casriga ah oo la xiriirta qalabka iyo teknikada ay Ciidammadu haystaan.

4. In Ciidammada loo abuuro kayd joogto ah oo tababaran si dhaqso ahna loo dhiiri gelin karo, loona hawl gelin karo marka loo baahdo.

5. In Muwaadiniinta gudanaysa hawsha Difaaca Qaranka ay muddada Ciidanka gudahiisa joogaan, qaataan aqoon farsamo iyo mid xirfadeedba oo wax tar u leh hawlaha Ciidammada iyo rayidka, si marka dib loogu soo celiyo bulshaweynta, ay shakhsi ahaan ugu faaiideystaan, una helaan awood dhexgal qaybaha wax soo saarka dalka.

## Qod. 3aad

### Shuruudaha Saldhigga u ah Xulka Muwaadiniinta haystana buugga Bad-maaxinta.

— In uu ka shaqeeyey Dekadaha Badda ama qaybta hawlo la xiriira xirfadaha Badda.

— Inuu haysto Shahaadada wadidda Doonyaha, Saxiimadaha iyo farsamooyinka la xiriira.

— Inuu ka shaqeeyey Shirkadaha sameeya nooyada Maraakiibta doonyaha iyo Saxiimadaha.

— Inuu aqoon u leeyahay jilaabashada Kalluunka ama ka shaqeeyey suuqyada Kalluunka.

— Inuu ka soo baxay Dugsiga Farsamada Badda ama Macaahidda iyo Jaamacadaha Farsamada Badda.

— Haddii uu codsado loona aqoonsado inuu leeyahay saansaan iyo niyad jeceyl ee Ciidan Badeed.

— In uu ka shaqeeyo ama ka shaqeeyey Hay'adaha Dawladda & Iskaashatooyinka xiriirka shaqo Badda la leh.

## Qod. 4aad

### Shuruudaha Saldhigga u ah Xulka Muwaadinka Loo Qaadanayo Ciidanka Cirka

Guud ahaan Muwaadiniinta loo qaadanayo Ciidanka Cirka, waxaa laga qaadanaya kuwa loogu tala galay Ciidammada Dhulka oo buuxiyey shuruudaha kaltanka H. D. Q. Hase yeeshee, waxaa xulashadooda tixgelin gaar ahaaneed la siinaya:

1. Jaamiciyiinta, Farsamayaqaanada iyo Xirfadleyaasha ku takhasusay hawlaha cirka iyo ardayda k.. qoran Qeybta Injiyeeridda Cirka.

2. Muwaadiniinta haysata shahaadooyinka Duuliyenimada Diyaaradaha madaniga ah.

3. Muwaadiniinta horey ku shaqeeyeen amase ka shaqeeya Shirkadda GaadiidkaCirka.

Qod. 5aad

Muwaadiniinta Loo Qaadanayo Ciidanka D. Cirka

Muwaadiniinta loo qaadanayo Ciidanka D. Cirka, waxay la xaalad yihiin kuwa loo qaadanayo Ciidanka Cirka ayadoo fiiro gaar ah la siinayo Muwaadiniinta ku takhasustay qaybaha Culuunta Eletoroonikada, Xisaabaadka iyo Fiisikada ama kuwa ka shaqeeyey Farsamooyinka la xiriira Maamulka Eletoroonikada,

Qod. 6aad

Xulka Muwaadiniinta Loo Qaadanayo Noocyada Ciidammada Qalabka Sida

Muwaadiniinta loo qaadanayo Noocyada Ciidammada Qalabka Sida ee ka baxsan X. D. S. (Ciidanka Booliska, Asluubta, Nabadsugidda iyo Guulwadayaasha), waxaa laga qaadanayaa kuwa loogu tala galay xulka Ciidammada Dhulka, waxaase fiiro gaar ah la siinayo hadba Farsamooyinka gaar ahaaneed uu u baahan yahay Ciidan waliba iyo saansaanta qofeed ee Muwaadinka.

Qod. 7aad

Dufcada H. Difaaca Qaranka

1. Dufcada H. D. Q. Waxay tahay Muwaadiniinta oo isku Da'da ah oo sannad wada dhalatay (Bilowgiisa ilaa dhammaadkiisa).

2. Dufcooyinka H. D. Q. waxay isugu xigaan hab isdabbjoog ah oo la xiriirta Da'da, waxaana la siinayaa dufco kasta magac koox ah iyo lambar u gaar ah oo lagu aqoonsado.

## QAYBTA LABAAD

### Xubnaha Hawsha Difaaca Qaranka

Qod. 8aad

Hoggaamiyaha H. D. Qaranka

Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga ayaa mas'uul ka ah Hoggaaminta H. D. Qaranka xagga qorsheynta, abaabulka, iskudubaridka iyo kormeerka fulinteeda.

Qod. 9aad

Hayadaha u Xilsaaran H. D. Q.

1. Guddiga Sare ee abaabulka hawsha Difaaca Qaranka, Hoggaanka abaabulka iyo Kicinta ee Wasaaradda Gaashaandhigga, Qaybaha iyo Waaxyaha H.D.Q. ee kala duwan oo u xil saaran Maamulka Dalka gudihiisa iyo dibadiisaba, waxayna si toos ah u hoos imaanayaan xubnahaasi Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga.

2. Safaaradaha Soomaaliyeed ayaa ka mas'uul ah xaqiijinta ka qaybgalka Muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ku nool dibedda (ku dhashay, ka shaqeeya) buuxiyeyna shuruudaha ka qayb galka H. D. Q.

3. Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, waxaa uga mas'uul ah Maamulka H. D. Q. Hoggaanka Qorshaha abaabulka iyo kicinta.

Qod. 10aad

Koobnaanta Guddiga Sare Abaabulka H. D .Q.

1. Wasiirka Was/da Gaashaan/ga — Guddoomiye
2. Taliyaha Ciidanka Booliska — xubin
3. Taliyaha Ciidanka Asluubta — xubin
4. Ttliyaha Ciidanka Guul/sha — xubin
5. Taliyaha Ciidanka Nabad/da — xubin
6. Madaxa H. Q. Abaa/ka & K. — Xoghaye

Guddigaas, waxaa kale oo la taliya xagga farsamada uu ugu yeeran karaa hay'adaha kala duwan ee Dawladda iyo gaar ahaan madaxda Hoggaamada Ciidammada Qalabka Sida.

Qod. 11aad

Waajibaadka Buddiga Sare ee Abaabulka H. D. Q.

1. Guddiga, wuxuu sannad kasta bilowgiisa daraa so ku sameynayaa, qorshaha sannadka ee kaltanka H. D. Q. ee uu soo diyaariyo Hoggaanka Qorshaha Abaa bulka iyo Kicinta, asagoo fiiro gaar ah siinaaya baahida iyo dhameystirnaanta C. Q. S. ayadoo la tixgelinaayo jagooyinka Farsamooyinka iyo xirfadaha kala duwan

ee C. Q. S. Awoodda Dugsiyada Tababarada ee layliska jadiidka, L/Saraakiisha, L.S.Xigeenka iyo takhasusyada, awoodda miisaaniyadda Wasaaradda Gaashaandhiga iyo noocyada C. Q. S. ku jaangooyeen H. D. Q. Xaaladaha guud ee markasta Daiku ku sugan yahay.

2. Guddigu wuxuu xaddidayaa tirada Muwaadiniinta ka qeyb galeysa H. D. Q. iyo tirada Ciidan kasta ku siinaayo, qorshaha baahida iyo helitaanka Muwaadiniinta loo qaadanaayo H. D. Q. (tirada baahida iyo inta la helay).

3. Guddigu, wuxuu go'aaminayaa arrin kasta oo culus oo heer qaran ah oo saameysa H. D. Q. oo ka gaari waayaan xallin qaybaha Abaabulka H. D. Qaranka.

4. Guddigu, wuxuu ansixinayaa, diidayaa, dib u dhigayaa xaaladaha Muwaadiniinta la xiriira oo ay soo gudbiyaan Guddi Hooseedyada heer Deegaan Ciidameed

Qod. 12aad

Qaybaha Abaabulka H. D. Q. Deegaan Ciidameed (Qaybaha)

Madaxda Qaybaha H. D. Q. xagga fulinta waajibaadkooda, waxay la kaashan karaan, haddii ay lagama maarmaan noqoto.

— Taliyeyaasha Ciidammada Qalabka Sida ee Qaybaha ay u xil saaran yihiin.

— Guddoomiyeyaasha Gobollada, Degmooyinka, Waaxyaha iyo Xafiisyada kala duwan ee Wasaaradda iyo Waaxyaha Hay'adaha Dawladda ee madax banaan.

Qod. 13aad

Waajibaadka iyo aagga Mas'uuliyadda ee Madaxda Qaybaha Abaabulka H. D. Q.

1. Madaxa Qaybta Abaabulka H. D. Q. Wuxuu mas' uul ka yahay dhammaan hawlaha la xiriira H. D. Q. ee Gobollada Deegaanka Ciidammada iyo Gobollada Abaabul ahaan u raacsam, fadhiyadooda waana sida ku xusan lifaaqa N. 1aad.

2. Waajibaadka Qaybta ee Abaabulka H. D. Q.

— Dersadda Hawlaha kala duwan ee H. D. Q. ee waaxda & Xafiisyada Abaabulka ee Gobollada.

— Jaangoynta iyo diyaarinta Qorshaha gaar ahaaneed ee H. D. Q. ee Gobollada iyo Degmooyinka raacsan sannad kasta.

— La socodsiinta diyaarinta tirakoobka Muwaadiniinta buuxisay shuruudaha H. D. Q. ee Gobollada.

— Xaqiijinta soo gudbinta liiska ka qayb galayaasha H. D. Q.

— Gaarsiinta tilmaamaha iyo diritiifooyinka Waaxda & Xafiisyada Abaabulka H. D. Qaranka.

— Iskudubaridka iyo kormeeridda hannaanka fulinta H. D. Qaranka.

— Xaqiijinta diyaarsanaanta iyo qalabaynta Dugsiyada Tababarka H. D. Qaranka.

— Diyaarinta Macallimiinta iyo qalabka Saldhigga waxbarashada.

— Xaqiijinta Diiwaan-gelinta Muwaadiniinta loo qaadanayo ka qayb galka H. D. Qaranka.

— La socodka, habaynta iyo ansixinta liiska Muwaadiniinta laga reebayo ka qayb galka H. D. Q. ayadoo qof kasta lagu hor caddeynayo sababta looga reebay ama dib loogu dhigay lana raacinayo qoraallada la xiriira ka reebidda H. D. Qaranka.

— Xaqiijinta hannaanka qorista diiwaanka kaydka ee Muwaadiniinta sannad kasta soo mara H. D. Q. iyo u gudbinta magacyadooda Waaxda iyo Xafiisyada Abaabulka ee H. D. Qaranka.

Qod. 14aad

Waajibaadka Waaxyaha & Xafiisyada Abaabulka H.D.Q.

— Waaxyaha iyo Xafiisyada H. D. Q. waa Hay'adaha sida tooska ah ugu mas'uulka ah maamulka isdabajoogga ah ee H. D. Qaranka.

Waaxyaha Abaabulka H. D. Q. Waxay si toos ah ugu xiran yihiin Hoggaanka Qorshaha Abaabulka iyo Kicinta iyo qaybaha Abaabulka H. D. Q. Saldhigyada iyo Degaanka Ciidammada.

Xafiisyada Abaabulka H. D. Q. ee Gobollada waxay hoos yimaadaan Waaxyaha Abaabulka H. D. Q. Waajibaadkooduna wuxuu yahay.

— Maamulka Hawlaha kala duwan ee H. D. Q. ee Gobol lada Degmooyinka ka tirsan.

— Joogtaynta iyo habaynta Qorshayaasha gaar ahaaneed ee H. D. Q. ee Gobolladaas.

— La socodka diyaarinta tirakoobka Muwaadiniinta buuxisay shuruudaha H. D. Q. ayagoo kala kaashanaya Xafiisyada Dawladaha Hoose (Ufficio Anagrafo) ee Gobolladaas.

— Xaqiijinta soo gudbinta liiska ka qayb galayaasha H. D. Qaranka.

— Gaarsiinta tilmaamaha iyo diritiifooyinka la xiriira qaban qaabada H. D. Q. Dadweynaha ku nool Gobollada, Degmooyinka iyo Hay'adaha Dawladda.

Xaqiijinta diiwaangelintta Muwaadiniinta ay ku waajibtay ka qayb galka H. D. Qaranka.

— Qoridda iyo xaqiijinta habka mideysan ee diiwaangelinta kala horreynta Dufcooyinka H. D. Qaranka.

— Qabanqaabinta iyo diyaarinta ka qaybgalayaasha H. D. Q. iyo u gudbinta Baaritaanka Guddiyada Caafimaadka.

— U kala soocidda iyo xulitaanka Muwaadiniinta u qalmidda H. D. Q. ayadoo u kala saaraya.

B. Ka qeybgelid.
T. Ka reebid.
J. Did ugu dhigid.
X. Ka dhuuntay (la waayey) ka qeyb galka H. D. Qaranka.

— Habaynta iyo u soo gudbinta liiska ka qeybgalayaasha qeybaha Abaabulka H. D. Q.

— Diyaarinta iyo habeynta dhammaan dokumentiyada Maamulka H. D. Q.

— Diiwaangelinta Muwaadiniinta soo gudatay H. D. Q. ee ku nool Degmooyinka ka tirsan Gobollada ayadoo loo kala qorayo, Degmo—Degmo iyo Dufco—Dufco Darajo, Farsamo iyo Takhasus si loogu hayo kaydka guud ee Ciidammada.
— Joogtaynta Xaaladaha isbeddelka Muwaadiniinta kaydka ah ee soo gudatay H. D. Q.
— Xafiisyada Abaabulka H. D. Q. ee Gobollada J. D. S. (fiiri lifaaqa 3aad).

QAYBTA SADDEXAAD
Habka Maamulka Hawsha Difaaca Qaranka
Qod. 15aad
Habka Maamulka Is Dabajooga ah ee H. D. Qaranka.

1. Xafiisyada Dawladaha Hoose ee Degmooyinka J. D. S. waa in ay diyaariyaan isla markaasna u soo gudbiyaan liiska Muwaadiniinta oo cimrigoodu gaaray 18 sano Xafiisyada H. D. Q. ugu dambeyn 15 ee bisha Jannaayo sannad kasta.

2. Madaxda Waaxyaha H. D. Q. ee Gobollada, waxay u soo gudbinayaan liiska Muwaadiniinta qaybaha Abaabulka H. D. Q. ee ka furan qaybaha, Saldhigga 43aad ama deegaanka Ciidammada Xamar ugu dambeyn 15 bisha Febaraayo ee sannad kasta.

3. Qaybaha Abaabulka H. D. Q. kaddib markay uruuriyaan, mideeyaan, u qoraan degmo—degmo, ayagoo magacyada liiska Muwaadiniinta isugu xijinaya habka kala horeynta xarfaha, waxay u soo gudbinayaan Hoggaanka Qorshaha Abaabulka iyo Kicinta ugu dambeyn 15 Abriile ee sannad kasta.

4. Hoggaanka Qorshaha Abaabulka iyo Kicinta, wuxuu uruurinayaa mideynayaa dhammaan liiska Muwaadiniinta ka qayb geleysa H. D. Q. oo ay soo gudbiyaan qaybaha Abaabulka H. D. Qaranka.

Kaddib markuu diyaariyo, mideeyo liiska ka qeyb galayaasha H. D. Q. oo ay u buuxsantay 18 sano, wuxuu soo hordhigayaa Guddiga Sare ee H. D. Q. sidoo kale Hoggaanka wuxuu guddiga soo hordhigayaa Qorshaha baahida Ciidammada iyo tirada ka qayb galayaasha H. D. Q.

Kaddib markii uu is barbardhigo baahida iyo awo odda dhaqaale, tirada Muwaadiniinta ka qayb galeysa H. D. Q. guddiga wuxuu soo saarayaa Jaangooyada guud ee H. D. Qaranka

5. Bisha Maajo bilowgeeda ee sannad kasta Guddiga Sare ee Abaabulka H. D. Q. wuxuu soo saarayaa Go'aan ay qeexayaan maalinta iyo/Saacadda loo yeera yo ka qeybgalayaasha H. D. Q. oo ay buuxsan tahay 18 sano.

Qod. 16aad

U Yeeridda Ka Qeyb Galayaasha H. D. Qaranka

1. U yeeridda Muwaadiniinta ka qeyb galaysa H. D. Q. waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah oo heer Wasaaradeed ah (Wasaaradda Gaashaan/ga).

2. Kaddib markii la soo saaro Faafintaas, waxaa loo gudbinayaa qeybaha iyo Waaxyaha Abaabulka H. D. Q. ee Ciidammada.

Qod. 17aad

Habka Fulinta Maamulka H. D. Qaranka.

1. Faafinta Rasmiga ah oo lagu soo saaro liiska Muwaadiniinta ka qeyb galaysa H. D. Q. iyo jaangooyada guud ee Wasaaradda Gaashaandhigga, waxaa loo gudbinayaa qaybaha iyo Waaxyaha Abaabulka H. D. Q. ee Ciidammada.

2. Qaqbaha ee Abaabulka H. D. Q. marku uu daraasad ku sameeyo jaangooyada guud ee Wasaaradda Gaashaandhigga, wuxuu soo saarayaa jaangooyada gaar ahaaneed ee H. D. Q. ee Gobollada raacsan waana sida soo socota:

B) Tilmaamaha guud ee jaangooyada H. D. Q.

T) Qorshaha barnaamijka shaqada ee fulinta H. D. Q. oo ay ku xusan yihiin taariikhda la fulinayo hawlaha, kulanada Madaxda qaybaha iyo Waaxyaha H. D. Q. ee Gobollada, u yeeridda Muwaadiniinta ka qaybgaleysa, soo ururinta, xulka soo gudbinta iyo soo xarayntar

Qod. 18aad

Xulka Muwaadiniinta Ka soo Qayb Galaysa H. D. Q.

1. Shuruudaha saldhigga u ah xulka ee Muwaadinka looga reebi karo ka qaybgalka H. D. Q. waxay yihiin: Caafimaad xumo maskaxeed iyo jireed (Incapacita' Fisico Psico- ama hufnaan xumada shaqsiyada qofka (Indignita' morale).

2. Caafimaad xumada jireed iyo midda maskaxeedba, waxay noqon karaan mid joogto ah ama mid aan jlgto ahayn.

Waxaa loola jeedaa caafimaad xumo joogto ah, marka ay qofka jirkiisa ka maqan tahay ama uu naafo ka yahay xubin muhiim ah oo horjoogsaneysa waxtar kiisa.

Caafimaad xumo aan joogto ahayn, waxay tahay mid ku xiran waqti kooban oo qofku dhibaatadeeda ka ga soo kabsan karo muddo kaddib, Muwaadinka ku sifoobay xaaladdaas, dib ayaa loogu dhigayaa gudashada Hawsha Difaaca Qaranka.

3. Hufnaan xumada shaqsiyadda Muwaadinka, waxaa loola jeedaa: In qofka ka qaybgalaya H. D. Q. uu ka dhowrsan yahay balwad lid ku ah hiddiha iyo dhaqanka, niyadda guud iyo Diintaba isla markaasna gelin dembi culus ama fal fadeexad weyn u keenaya bulshada, iyadoo ujeedadu tahay in laga fogeeyo Ciidammada Dadka caynkaas ah, si loo dhowro sharafta iyo haybadda Ciidammada.

4. Waxaa kaloo H. D. Q. laga reebayaa Muwaadinka ku sifooba xaaladaha soo socda:

B) Madiga labadiisa Waalid ayan lahayn caruur kale

T) Agoonta labadiisa Waalid dhinteen oo korinaaya caruur la dhalatay.

J) Muwaadinka qoys madax u ah, dhalayna caruur badan oo isagu ka mas'uul yahay cid kale oo u hay sana ayna jirin.

X) Muwaadinka dhererkiisu gaarayn 1.50 (cilin)

Kh) Muwaadinka [illegible]

ahayn oo u dhaxeeya lab iyo dheddig (Lbeeb) amase Abuurkiisa jireed u dhisan yahay si dabeecadda bani aadamka ka duwan.

5. Muwaadinka buuxiya shuruudaha ka qaybgalka H. D. Q. iyo kuwa ku xusan xubnaha 2aad, 3aad iyo 4aad ee qodobkan, waxaa saameynaya kala soocid hore iyadoo la tixgelinayo waxyaabaha soo socda.

B) Heerka Caafimaadkiisa iyo dhismihiisa jireed, heerka caqligiisa iyo aqoontiisa.

T) Heerka tacliinta iyadoo loo kala saarayo Ummi, Dugsiga Hoose, Dugsiga Dhexe, Dugsiga Sare, ka sarree ye Dugsiga Sare, Jaamici.

J) Nooca shaqada uu hayey iyo xirfadaha uu yaqaan.

Tilmaamaha xirfadaha kor ku xusan oo saldhig u noqonaya u kala qaybinta Muwaadiniinta la soo xaree yey takhsusyada, Farsamooyinka iyo xirfadaha kala duwan, waxaa Muwaadin kasta looga qorayaa jallaadkiisa shaqsiga, iyadoo kartidiisa iyo saansaanta dabeecadda (Attitudine), la sii sugayo muddada uu ku jiro Layliska jadiidka.

Koobnaanta habka Maamulka is dabajoogga ah ee H. D. Qaranka (Fiiri lifaaqa 4aad).

Qod. 19aad

Habka Baarista Caafimaadka

Muwaadinka loogu yeeray gudashada H. D. Q. wuxuu xareynta ka hor marayaa laba heer oo baaris Caa fimaad oo kala ah. Baarista Caafimaadka hore iyo Baa rista Caafimaadka Buuxa.

1. Baarista Caafimaadka hore waxaa lagu xaqii jinayaa Caafimaadka guud ee Muwaadinka iyadoo fiiro gaar ah la siinayodhammaanshaha dhismaha, hannaanka jirka iyo tilmaamaha kale ee ku xusan xarafka (X iyo Kh) ee xubinta 4aad ee Qodobka 19aad.

2. Baarista Caafimaadka Buuxa oo lagu xaqiijina

Qod. 20aad

Xubnaha Guddiga Baarista Caafimaadka

1. Guddiga Baarista Caafimaadka hore oo ah heer Gobol, Degmo & Saldhig waxaana magacaabaya mada xa qaybta Abaabulka ee H. D. Q. Wuxuuna ka kooban yahay:

— Madaxa Caafimaadka Gobolka — «Guddoomiye».
— Saddex Dhakhtar oo taqasus kala duwan leh oo ka tirsan Ciidammada Q. S. Iyo Wasaaradda Caafimaad ka — «Xubno».

2. Guddiga Baarista Caafimaadka buuxa, waa gud di heer Qaran ee uu magacaabo Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, wuxuuna ka kooban yahay.
— Dhakhtar oo taqasus kala duwan leh oo ka tirsan Cii dammada Qalabka Sida.

— Iyo Wasaaradda Caafimaadka — Xubin

3. Haddii Dhakhtarka Ciidammada ay takhasus ahaan ama tiro ahaan ku fillaan waayaan hawsha, wa xaa xubnaha Guddiyada kor ku xusan ka mid noqona yaa Dhakhaatiir Rayid ah oo ka socdaan Wasaaradda Caafimaadka.

Qod. 21aad

Cudurada Layskaga Reebo Ka Qayb Galka H. D. Q.

1. Cudurada Muwaadinka looga reebayo ka qayb galka ama looga saarayo H. D. Q. waxay ka mid yihiin isla cudurada lagu ruqseeyo xubnaha Ciidammada Q. Sida oo ku xusan Shaxda 1aad, 2aad ee qodobka 7aad ee Sharciga lambar 51aad soona baxay 28.7.81, kuna saabsan qiimeynta Caafimaadka Dadka ka tirsan Ciid ammada Q. Sida ee ku xusan (Lifaaqa 5aad).

QAYBTA AFRAAD

Tababarada Hawsha Difaaca Qaranka

Qod. 22aad

Tababarada Hawsha Difaaca Qaranka

1. Tababarada H. D. Q. waxay saameeyaan u di yaarinta Muwaadiniinta gudaneysa H. D. Q. waajibaad ka la xiriira xilalka, Takhasusyada Xirfadaha iyo Far samadaha kala duwan [illegible]

2. Qaybaha muhiimka ah ee Tababarada waxay yihiin:

— Tababarka Layliska Jadiidka.
— Tababarka Layliska Sarkaal.
— Tababarka Layliska S/Xigeen.
— Tababarka Farsamayaqaanada & Hawl gaarlayaasha.

3. Barnaamijka Tababarka H. D. Q. wuxuu ku xusan yahay Qorshaha gaar ahaaneed ee Tababarka.

Qod. 23aad

Tababarka Layliska Jadiid

1. Muwaadiniinta buuxisa shuruudaha ku xusan qod. 6aad 8aad iyo 10aad ee xeernidaamiyaha, waxay galayaan marka laga reebo kuwa galaya tababarka loogu Saraakiil, tababarka layliska Jadiidka oo ah 6 bilood oo xiriir ah.

2. Tababarka layliska Jadiidka ujeeddadiisu waxay tahay:
— In la gaarsiiyo muddada uu ku jiro leyliska, heer di yaargarow dagaal oo si waxtar leh uu kaga qayb geli karo goobaha Dagaalka.
— In Muwaadinka ka yimid Rayadka ah loo diyaariyo nolol Askareed.

3. Jadiidka markii ay dhammeystaan tababarka layliska, waxaa lagu magacaabayaa derajada ah Dable, qaybka mid ahna waxaa loo qaada karaa S/Xigeen iyo Farsamayaqaanno sare oo ay Ciidammdu u baahan yihiin, inta kalena loo kala qaybinayaa N. C. Q. Sida Noocyada Ciidammada X. D. S. iyo Jaadadka Colalka.

Qod. 24aad

Tababarka Leylis Sarkaal

1. Waxaa Tababar la siinayaa laylis Saraakiisha loo diyaarinayo iney noqdaan Saraakiisha H. D. Q. wuxuna isugu jiraa mid aqoon guud oo ku saabsan barashada Maadooyinka asaasiga ee wadar ahaan u saameeya takhasusyada kala duwan iyo mid takhasuseed oo ku saabsan barashada iyo horugu dhaadhaca takhasus ama xirfad ka mid NoocyadaCiidammada iyo Jaadadka Colalka.

2. Tababarka leylis Sarkaal ee H. D. Q. oo lagu qaadanayo Kuuliyadda Ciidammada, waxaa geli kara oo keliya Muwaadiniinta haysata Shahaado Jaamici iyo kuwa u dhigma.

3. Muwaadiniinta loogu yeeray H. D. Q. oo haysta Shahaadada Dugsiga Sare, waxaa loo qaadan karaa ley lis Sarkaal, markii ay jirto baahi orkaaniko ah.

Qod. 25aad

Tababarka Saraakiil Xigeen

1. Tababarka S/Xigeen, waa Tababar la siiyo Dab leyda kaddib markii ay soo qaataan kan layliska Jadii dka, wuxuuna isugu jiraa mid aqoon guud iyo mid takhasuseed oo loogu diyaarinayo S/Xigeenka, barashada waajibaad gudashada xilka kala duwan.

2. Waxaa tababarka S/Xigeenka loo qaadanayaa Dablaha si wanaagsan u soo gutay tababarka layliska Jadiidka, lana sugay kartidiisa, saansaanta dabeecaddiisa (Attitudine) iyo Asluub haystana Shahaadada Dugsiga Sare ama Dugsiga Dhexe iyo Farsamayaqaanada Sare ee aan haysan Shahaado dugsiyeed oo aqoontooda xirfadeed loo qiimeeyey heer dugsi Sare ama dugsi Dhexe.

3. Tababarka S/Xigeen, wuxuu u qaybsamaa Takhasusyada noocyada Ciidammada Q. Sida, Noocyada Ciidammada X. D. S. iyo Xirfadaha Jaadadka Colalka iyo Farsamadaha kala duwan.

Qod. 26aad

Tababarka Farsamayaqaanada iyo Hawlgaarayaasha

1. Tababarada Farsamayaqaanada iyo Hawlgaarlayaasha waxaa lagu diyaarinayaa Dableyda la siinayo aqoon Farsamo iyo hawlaha gaar ahaaneed ee la xiriira kabidda, hagaajinta qalabka iyo alaabada kala duwan ee Ciidammada.

2. Waxaa Tababarka kor ku xusan loo qaadanayaa Dableyda haysata Shahaadooyinka Farsamo iyo kuwa horey hawl ahaan ugu soo shaqeeyey, waxaana lagu tababarayaa Dugsiyada u gaarka ah.

Qod. 27aad

Tababarka Takhasusyada H. D. Qaranka

1. Tababarka Takhasusyada Ciidammada waxaa loola jeedaa tababarada gaar ahaaneed ee la siiyo dadka ka tirsan Noocyada Ciidammada iyo Jaadadka Colalka, si looga yeelo aqoon xirfadeed.

2. Tababarada Takhsusyada waxaa la siinayaa dhammaanDableyda, S/Xigeenka & Leylis Saraakiisha H. D. Q. waxayna ku qaadanayaan dugsiyada mid walba loogu tala galay.

Qod. 28aad

Muddada Hawsha Difaaca Qaranka

1. Muddada H. D. Q. waa laba (2) Sano oo xiriir ah laga bilaabo taariikhda ay Dufco walba gasho Dugsiyada H. D. Q. Muddadaas waxay u kala baxdaa laba xilli oo kala ah xilliga tababarka iyo xilliga shaqada.

2. Xilliga tababarka wuxuu u kala baxaa laba qaybood oo kala ah qaybta leylinta Jadiidka iyo Saraakiisha iyo qaybta takhasuseed oo lagu qaadanayo maadooyin gaar ahaaneed sida barashada takhasusyada Noocyada Ciidammada, xirfadaha, Jaadadka Colalka iyo Farsamadaha kala duwan.

3. Muddada la qaadanayo tababarrada kala duwan waa sida soo socota:

B) Tababarka layliska Jadiidka iyo L/Saraakiil waa 6 (Lix) bilood oo xiriir ah.

T) Tababarka S/Xigeenka, Farsamada iyo Takhasusyada kala duwan waa 3 (Saddex) bilood oo xiriir ah.

4. Muddada tababarka L/Saraakiisha H. D. Q. oo haysta shahaaddo Jaamici ee Kuuliyadda Caafimaadka iyo Daawooyinka (Medicina) ee Farmacisti), kuwaasoo qaadanaya Tababar gaaban ee aqoon guud ee Militerinimo oo 90 maalmood ah (Saddex Bilood).

Qod. 29aad

Habka Xiriirka Ka Qayb Galayaasha H. D. Q.

Iyadoo waafaqsan Marxaladaha leyliska tababarka Takhasuska iyo muddada shaqada, waa in H. D. Q. loo qorsheeyaa hab xiriirsan oo dufcooyinka si isdabajoog ah oo aan kala go'lahayn isku weydaarsadaan si ayan dhaxraalo uga soo bixin. Sidaas awgeed, si loo xaqiijiyo dhammeystirnaanta iyo hawlgalka Ciidammada waa in markasta jaangooyada suuragelisaa in la helo dufco tababar, dufco hawlgal ah, isla markaana ay diyaarsan yihiin kuwii beddeli lahaa (Fiiri Lifaaqa 6aad).

QAYBTA SHANAAD

Mawqif Shareiyeedka Muwaadinka ka qayb galaya HDQ

Qod. 30aad

Xeerka Lagu Dhaqayo H. D. Qaranka

1. Muwaadinka loo qoray H. D. Q. Muddada uu ku jiro tababarka iyo shaqada Ciidammada wuxuu yeelanayaa xuquuqda maamuleed (Dhaqaale ee la mid ah kuwa ay isla darajada yihiin ee ka tirsan Ciidammada Qalabka Sida.

2. Muwaadiniinta Gudanaysa Waajibaadka H.D.Q. waxaa lagu dhaqayaa muddada ay ku jiraan tababarka iyo shaqada nidaamka Dhisibiliinka X. D. S. Xeerka Ciqaabta C. Q. S. iyo Xeerka kala ee u degsan Ciidammada

Qod. 31aad

Mudnaashada Derejooyinka

1. Dableyda sida wanaagsan u dhameysata tababarka Jadiidka ee ku guuleysa waaya tartamada tababarka S/Xigeenka L/Saraakiil iyo Farsamada waxaa loo kala qaybinayaa Ciidammada.

2. Dableyda dhameysata tababarada S/Xigeenka iyo Farsamoyaqaanada heerkooda aqooneed loo qiimeeyey in ay qaban karaan xilal S/Xigeen, waxaa loo dalacsiin karaa Darajada Alifle L/Alifle.

3. Dableyda, Alifleyda, S/Xigeennada iyo Farsamayaqaannada H. D. Q. ee doorta inay ku haraan shaqada Ciidammada waxaa lagu dhaqayaa xeerarka iyo Nidaamyada u degsan Ciidammada Joogtada ah.

4. L/Saraakiisha si wanaagsan u dhammeysata tababarka layliga ee lagu siiyay Kuliyadda Ciidammada waxaa loo dalacsiinayaa Darajada Xiddigle H. D. Q.

Qod. 32aad

Kala Horeynta Darajooyinka

— Saraakiisha isku Darajada ah ee ka kala yimid H. D. Q. iyo kuwa Ciidammada Joogtada ah, haddii ay meel wada joogaan, waxaa mudnaanta kala horreynta leh kan Ciidammada Joogtada ah.

Qod. 33aad

Sarkaalka Hawsha Difaaca Q. ee ku Hara Ciidammada

— Sarkaalka H. D. Q. ee ku hara Ciidammada, ka dib markuu qaato tababar gaaban oo aqoon kororsi ah, waxaa loo dallacsiin karaa Darajada ah L/Xidigle wuxuuna ka mid noqonayaa Saraakiisha Ciidammada oogtada ah.

Qod. 34aad

Tixgelinta H. D. Q. Xagga Xiriirka Shaqada

— Muwaadinka dhammeysta H. D. Q. haddii uu ku haro shaqada Ciidammada ama uu u gudbo shaqooyin kale ee hay'adaha Dawladda, waxaa loo tixgelinayaa xagga xiriirka shaqada (Ansianita- Muddadii uu gudanayey H. D. Qaranka.

Qod. 35aad

Xaalada Kordhin Kara Muddada H. D. Q.

— Waxyaabaha kordhin kara H. D. Q. Muddadeeda waxay yihiin:—

1. Haddii Muwaadinku galo Ganaax Dhisibiliineed oo wadartiisu gaareyso 72 maalmood iyo wixii ka badan muddada uu ku jiray tababarka iyo shaqada Ciidammada, waxaa loogu kordhinayaa waqtiga H.D.Q. Tirada maalmaha la ganaaxay.

2. Marka Muwaadika gudanaya H. D. Q. uu galo dembi Maxkamadeed oo Ciqaabtiisu gaarayso 5 Sano oo xarag ah dib looguma soo celinaayo Gudashada H.D.Q.

3. Marka Muwaadinka lagu eedeeyey dembi Maxkamadeed, hase yeeshee ay Maxkamaddu dembigii ku weydo ama Cafis loo fidiyo dib looguma raacanayo Muddaduu ka maqnaa H. D. Qaranka.

Qod. 36aad

Ka Sii Deynta Shaqada H. D. Qaranka

Muwaadinka ku jira H. D. Q. waxaa looga sii deyn karaa Sababaha soo socda:

1. Markii ay u dhamaato laba sano oo xariir ah haddii uusan la imaan Xaaladaha kordhin kara mudda da oo ku xusan Qodobka 36aad.

2. Haddii asagoo gudanaya H. D. Q. ay ku soo ba xaan cuduroo ka mid ah kuwa ku xusan Shaxda 1 iyo 2 ee qodobka 21aad, ee Xeer Nidaamiyaha.

3. Haddii uu ku sifoobo xaalad ka mid ah kuwa ku xusan qodobka 19aad.

Qod. 37aad

Dib Ugu Yeerista Muwaadin H. D. Qaranka

1. Muwaadiniinta horey u gudatay H. D. Q. waxaa mar kale dib loogu yeeri karaa H. D. Q. Sababaha soo socda awood:—

— Si loo joogteeyo diyaargarowgooda dagaaleed iyo Aqoontooda xirfadeed ee Ciidammada.

— Si loo siiyo aqoon kororsi xagga dotariinada iyo Ma baadi'da Dagaalka siiba marka ay Ciidammada ku soo biiraan tegnika cusub ama marka wax iska bed delaan dhisaha Jaangooyada iyo Xeerarka Dagaal ka ee u degsan Ciidammada.

— Marka ay abuuranto xaalad Dagaal loona baahdo in la sameeyo abaabul Guud.

— Dib ugu yeeridda tababareed, ee H. D. Q. waxay khu seysaa oo keliya Saraakiisha H. D. Q. iyo S/Xigeenada Farsamada gaarka ah, waxaana loo yeeri karaa wa qti kasta oo loo baahdo.

Qod. 38aad

Ka Joojinta Dhoofidda

1. Muwaadiniinta aan gudan H. D. Q. waxaa ka reeban in la siiyo Dokumentiga ka dhoofidla Dalka (Passaporto).

2. Haddii ay abuuranto xaalad gaar ahaaneed oo la xiriirta Difaaca Dalka, ayadoo lagu soo saarayo xeer Madaxweyne, waxaa Muwaadiniinta gutay H. D. Q. laga joojinayaa dibad u dhoofidda.

Qod.39aad

Dokumentiyada Hawsha Difaaca Qaranka

1. Dokumentiyada H. D. Q. waxay yihiin kuwa ka la nooc ah oo kala sameeya hawlaha kala duwan ee Maamulka H. D. Q.waxayna yihiin kuwa dhammaysti ran, mideysan (Standard) oo u habeysan mid kasta loo gu tala galay.

2. Dokumentiyada H. D. Q. waa inay xannaanay san yihiin qoristooduna joogtaysan tahay oo lagu heli karo Waaxyaha iyo Xafiisyada laga maamulo H. D. Q. Isla markaana maamulkoodu is waafaqsan yihiin.

Qod. 40aad

Dhaqan Gal

Xeer Nidaamiyahaani wuxuu dhaqan galayaa 15 maalmood kaddib marka lagu soo saaro Faafinta Ras miga ah ee J. D. Soomaaliya.

Muqdisho, 27.5.83

WASIIRKA WASAARADDA GAASHAANDHIGGA

S/Guud Maxamed Cali Samantar

## L I F A A Q :

1. Xeerarka Guddiyada H. D. Q. Fadhigooda iyo Aagga Mas'uuliyadla Lifaaq L. 1aad.

2. Koobnaanta Dhismaha Hawsha Difaaca Qaran ka Lifaaqa L. 2aad.

3. Xafiisyada Abaabulka H. D. Q. ee Gobollada J. D. Soomaaliyeed Lifaaqa L. 3aad.

4. Koobnaanta Habka Maamulka Is dabajooga ah ee H. D. Qaranka Lifaaqa L. 4aad.

5. Cudurrada Leysaga Reebo Ka Qayb Galka ama H. D. Qaranka Lifaaqa L. 5aad.

6. Habka Xiriirka ka Qayb Galayaash H. D. Q. Lifaaqa 6aad.

Cudurada Leysaga Reebo ka Qayb Galka ama Shaqada H. D. Qaranka Lifaaqa L. 5aad.

Shaxda Koowaad

B. Qaybta Koowaad:—Cuduradaha Gudaha.

1. Diabete Mollito Grave, (Millitus Diadbebes Sorius).

2. Malformazione and Acquire Cardiac Malformation.

3. Tumori Maligni (Malignum Tumoros ).

4. Empatio Sistomiche Sistomie Heamoopathy (Heamopathy) Empopatie.

T. Qaybta 2aad:— Cudurada Madaxa.

1. Epilessia (Epilepsy).

2. Psicosi (Psilepay).

3. Malattie Degenerative del sistema nervosa (Mano Trastra Palegia, Paraplegia).

4. Psicopatia (Psychopathy).

J. Qaybta 3aad: Cudurada Indhaha.

1. Glayooma, mono bilaterale con altrazione del

fondo di visto fino a 0,5 (Glauoma mano bilateral with difect of the forsdus, andesght up 0,5).

2. Atrofia del nervo attico mino bilaterale di natu ra vario bilaterale con bito fino 0,5 mono laterale fino 0,2. Atrophy of optic nerve uni bilateral of various natu re, if uni lateral with supuir UPO,2).

3. Leucome Generale mono bilateral con vista fino 0,5 e mono laterale con vista 0,2.

X. Qaqbta 4: Cudurada Sanka, Dhegaha iyo Cunaha.

1. Sordita assoluta bilaterale absoluto bilateral defenss.

2. Sordimutismo e mutismo organico mordimoll & mutism.

3. Neo plesie nella otorino laringoiatrica Neoplc. In the E. N. T.

4. Malformazione e esito permanente di lesione e malattie della labbre, orecchie, naso, platione permane nti malformation & result of lesion or desessis of the li ps, ear nose & plationom.

5. Afachia mono bilaterale aphakis uni bilateral.

6. Tumore della orbita e dell'occhio tumor of the orbit and the eye boll.

7. Emorolapia Hemorolapia.

Kh. Qaybta 5aad: Qalliinka:—

1. Ressessione intestinale intestinal resections.

2. Anus pretonaturale.

D. Qaybta 6aad: Cudurrada Maqaarka.

1. Lues II. III. St.

2. Ustione II. III. St, Combustione II. III. Stag.

Shaxda 2aad

Sharciga Guddiyada Qiimeynta Caafimaadka C. O. S.

B. Qaybta 1aad: Cudurrada Gudaha:—

1. TBC, Polmonare, extra polmonare and extra polmasar TBC.

2. Cirrosi opatica e epatoma cirrhesis and hepato ma.

3. Ipertenziine essensiale III. stage Essentil hipe ratention III. Stage.

4. Poiaethitis con deformazione ossea poliarterite with borne deformation.

5. Bërhco ectasia bronche ektasis.

6. Glomerulonefrite cronica chronic clumerule phtis.

7. Tireotossicosi thyriotossicosis.

8. Malattieda radiazione di R. X. Radiation dIse ase.

9. Splenomegalia di warie nature Splenomegaly of various nature.

T. Qaybta 2aad: Cudurrada Madaxa.

1. Schizofrenia, Schizophrenis.

2. Malattie del sistema nervoso centrale e periferi ca di natura vascolare infettive e traumatica (meningo, enci falite e disturbo del centro spinale).

Diseasis of the contral and prechrial nervus system the cause is vasoular, infectional and traumatics (Insul enceratis menig encelitis).

J. Qaybta 3aad: Indhaha.

1. Stato postene unibelaterale condition afer ene calation unibilateral.

. Tracoma, Trachoma.

3. Malattie croniche della ghiandole lacrimale la descriotite cronica chronic dacriocystittis.

4. Disturbi cronica della malattie dei muscolari oculari (diplopia). Chronic distures of movement of the ocular muscules (diplopia).

X. Qaybta 4aad: Qalliinka.

1. Esita poste qastroectomia e nefroectomia Result of the gastroectomy and nefhroectomy.

2. Amputazione della arti amputatione of the lamps.

3. Lobectomia total, total lebectomy.

4. Amputazione della I. II. dite della arte superiore Amputation of I. II. fingers of the hands.

5. Amputazione della dito totale delle arti. Totale amoutation of fingers of limp.

6. Strittura permanente della bie urinarie permanente srieture of urinary tract.

7. Anchilosi dell'articolazione di varie nature anchilesis of joint of various nature.

8. Uteroetomia Uteroetomia.

9. Deformazione ossea postraumatica di varie nature postraumatic and other aethioiogy of bornes deformations.

D. Qaybta 5aad: Cudurrada Maqaarka.

1. Eczema Extemy.
2. Psoriasis.
3. Lichan ruber planus.


## WAAXAHA ABAABULKA HAWSHA DIFAACA QARANKA EE GOBOLLADA J. D. S.

| X/T | Magacyada Waaxaha Abaabulka H.D. Qaranka | Fadhiga Xafiisyada | Aagga Mas'uuliyadda Xafiisyada | Xusuus |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Waaxaha Dhexe ee Abaabulka H.D. Qaranka | Muqdisho | Gobollada Banaadir, Sh. Dhexe iyo Sh. Hoose | |
| 2. | Waaxaha Abaabulka H.D. Qaranka | Jowhar | Gobolka Shabeelada Dhexe | |
| 3. | Waaxaha Abaabulka H.D. Qaranka | Marka | Gobolka Shabeelada Hoose | |
| 4. | Waaxaha Dhexe ee Abaabulka H.D. Qaranka | Baydhabo | Gobolka Bay, Bakool iyo Gedo | |
| 5. | Waaxaha Abaabulka H.D. Qaranka | Xuddur | Gobolka Bakool | |
| 6. | Waaxaha Abaabulka H.D. Qaranka | Garbaharray | Gobolka Gedo | |
| 7. | Waaxaha Dhexe ee Abaabulka H.D. Qaranka | Dhuusamareeb | Gobollada Hiiraan, G/Gaduud, Mudug Iyo Nugaal. | |
| 8. | Waaxaha Abaabulka H.D. Qaranka | B/Weyne | Gobolka Hiiraan | |
| 9. | Waaxaha Abaabulka H.D. Qaranka | Gaalkacyo | Gobolka Mudug | |
| 10. | Waaxaha Abaabulka H.D. Qaranka | Garoowe | Gobolka Nugaal | |
| 11. | Waaxaha Abaabulka H.D. Qaranka | Kismaayo | Gobolka Jubbada Hoose | |
| 12. | Waaxaha Abaabulka H.D. Qaranka | Bu'aale | Gobolka Jubbada Dhexe | |
| 13. | Waaxaha Abaabulka H.D. Qaranka | Hargeysa | Gobolka W/Galbeed, Togdheer, Sanaag Iyo Bari | |
| 14. | Waaxaha Abaabulka H.D. Qaranka | Burco | Gobolka Togdheer | |
| 15. | Waaxaha Abaabulka H.D. Qaranka | Boosaaso | Gobolka Bari | |

**HEERARKA GUDDIYADA H.D.Qaranka FADHIGOODA IYO**
**AAGAGGA MAS'UULIYADDA**


| /T | Nooca Guddiga | Fadhiga Gu/ga | Aagga Mas'uuliyadda | Xusuus |
|---|---|---|---|---|
| | Guddiga Sare ee Abaabulka H.D. Qaranka | Muqdisho | J.D.S | |
| | Waaxda Abaabulka H.D. Qaranka | Muqdisho | Gobollada Banaadir Sh/Dhexe, iyo Hoose | |
| | Waaxda Abaabulka H. D. Qaranka | Dhuusa Mareeb | Gobollada Hiiraan, Galgaduud iyo Nugaal | |
| | Waaxda Abaabulka H.D. Qaranka | Hargeysa | Gobollada W/Galbeed, Togdheer, Sanaag Iyo Bari | |
| | Waaxda Abaabulka H.D. Qaranka | Baydhabo | Gobollada Bay, Bakool iyo Gedo | |
| | Waaxda Abaabulka H.D. Qaranka | Kismaayo | Gobollada J. Hoose iyo J. dhexe | |
| | Waaxda Abaabulka H.D. Qaranka | Garowe | Gobollada Nugaal, Mudug iyo Bari | |

# DHISMAHA XUBNAHA IYO XAFIISYADA
# HAWSHA DIFAACA QARANKA



# HABKA MAAMULKA ISDABA-JOOGGA AH EE HAWSHA DIFAACA QARANKA

Lifaaqa L. 4aad



## HABKA XIRIIRKA DUFCOOYINKA H.D.Q.
## GARAAFIKADA XILLIYADA LEYLISYADA JADIIDKA, TAKHASUSYADA IYO SHAQADA

